



Federal Republic of Somalia
Federal Parliament
The Upper House

Nuqulka Rasmiga Ah ee Hadal Qoraalka Gaaban ee Golaha Aqalka Sare ee BFS
Si waafaqsan Qod.39aad ee Xeer hoosaadka Golaha Aqalka Sare

Baarlamaanka 11 ^{aad}	
Kalfadhiga: 7 ^{aad}	Kulanka: 2 ^{aad}
Taariikhda: 10/11/2025	Goobta Fadhiga: Xarunta Aqalka Sare
Saacadda uu Furmay: 11:53 AM	Saacadda uu Xirmay: 12:10 PM
Shir Guddoonka Fadhiga: Guddoomiye ku xigeenka 2aad ahna ku-simaha guddoomiyaha Senator Cabdullahi Cali Xirsi (Timacade).	Guntanka Kulanka: 28 Senator
Martida Kulanka: Ma jirin marti	Ajendayaasha Kulanka: Ajendaha: - Akhrinta Aayadaha Qur'aanka Kariimka. - Ansixinta Ajendaha. - Akhrinta 2^{aad} ee Hindise Sharciyeedka Maalgashiga Dhismaha Hay'adda Maalgashiga Soomaaliyeed. - Ka doodista Warbixinta Ku Saabsan ka talo bixinta kaalinta Aqalka Sare Arrimaha Dowladaha Xubnaha ka ah Dowlada Federaalka iyo Aqalka Sare.

Furitaanka Kulanka:

Kulanka ayaa lagu daahfuray Aayadaha Qur'aanka Kariimka ee uu Akhriyay Sen Xuseen Maxamed Daahir.

Ansixinta Ajendayaasha Kulanka:

Guddoomiye ku xigeenka Golaha Aqalka Sare Sen Cabdullahi Cali Xirsi (Timacade) ayaa xubnaha kulanka fadhiyey ka codsaday in ay ansixiyaan Ajandayaasha kulanka, waxaana lagu ansixiyay hab gacan taag ah, codaynta ayaa u dhacday sidaan:

Oggol: 28 Senator

Aamusnaansho: Majirin

Diidmo: Majirin

Nuxurka Kulanka:

Guddoomiye Cabdullaahi Cali Xirsi (Timacadde), Ayaa u yeeray Guddoomiye ku xigeenka Guddiga Arrimaha Dibadda Senator Cabdiwali Ibraahim Garyare si uu Golaha uga hor akhriyo warbixinta akhrinta labaad ee Hindise Sharciyeedka Dhisidda Hay'adda Maalgashiga Jamhuuriyada Federaalka Soomaliya. Warbixinta kaddib, Guddoomiye Cabdullaahi Cali Xirsi (Timacadde), Ayaa u yeeray Senator Cabdiqani Ugaas Geele si uu uga hor akhriyay golaha Warbixin Ku Saabsan ka talo bixinta kaalinta Aqalka Sare Arrimaha Dowladah Xubnaha ka ah Dowlada Federaalka iyo Aqalka Sare, intaa kaddib 7 Senator ayaa dood ka yeeshay.

Go'aamada kulanka:

1. Ansixinta Ajendayaasha kulanka.
2. Guddoomiye ku xigeenka 2aad ayaa faray Guddiga Arrimaha Dibadda inay soo diyaariyaan qodobada laga dooday, iyaga oo la kaashanaya sharciyaqaanada Golaha Aqalka Sare, si loo marsiiyo akhrinta saddexaad.

Ugu dambayntii Guddoomiye ku xigeenka 2aad ahna ku-simaha guddoomiyaha senator Cabdullaahi Cali Xirsi (Timacadde) ayaa kulanka xiray Sacadu markay ahayd **12:10 PM**

DHAMAAD